Siyaasadda Codsiga Rafcaanka ee Qaybaha Early Achievers

Overview

Ka qaybgalayaasha Early Achievers waxay codsan karaan rafcaan ku saabsan qayb la dhammeystiray haddii ay aaminsan yihiin in dhibcaha si khaldan loo bixiyay iyadoo lagu salaynayo caddeymaha ay markii hore soo gudbiyeen intii lagu jiray Wareegga Aqoonsiga Tayada (Quality Recognition Cycle).

Codsiga Rafcaanka Qaybta (Component Appeal Request) wuxuu wax ka qabtaa khaladaadka suurtagalka ah ee ku saabsan dhibcaha ama qiimeynta. **Ma aha** hab lagu soo gudbiyo caddeymo cusub ama dheeraad ah ka dib marka qayb ama Heerka Tayada (Quality Level) la dhammeystiro.

Ka qaybgalayaashu waxay codsan karaan Codsiga Rafcaanka Qaybta mid kasta oo ka mid ah qaybahan:

- Program Profile
- Video Highlight(s)
- Records Review
- Accreditation
- Professional Development and Training

U-qalmitaanka iyo Muddada Waqtiga:

Ka qaybgalayaashu waa inay soo gudbiyaan Codsiga Rafcaanka Qaybta muddada ku habboon:

- **Ka hor inta aan Heerka Tayada la dhammeystirin:** Soo gudbi codsiga **45 maalmood gudahood** laga bilaabo marka qaybta la dhammeystiro.
- **Ka dib marka Heerka Tayada la dhammeystiro:** Soo gudbi codsiga **14 maalmood gudahood** laga bilaabo marka Heerka Tayada la dhammeystiro.

Haddii Heerka Tayada la dhammeystiray, DCYF waxay si ku-meel-gaar ah uga saari doontaa Heerka Tayada inuu si guud u muuqdo inta Codsiga Rafcaanka Qaybta dib loo eegayo.

Sida Loo Codsado Codsiga Rafcaanka Qaybta:

1. Email u dir QRIS@dcyf.wa.gov si aad u codsato Foomka Codsiga Rafcaanka Qaybta (Component Appeal Request Form).
2. Buuxi foomka, oo si kooban u sharax arrinta aad ka walaacsan tahay adigoo isticmaalaya oo keliya caddeymaha markii hore la soo gudbiyay:
    - **Dib-u-eegista Diiwaannada:** Sheeg qaybta ama qaybaha heerarka ee aad aaminsan tahay in si khaldan loo qiimeeyay, oo sharax sababta.
    - **Muuqaallada Muhiimka ah:** Sheeg tilmaamaha aad aaminsan tahay in si khaldan loo qiimeeyay, oo sharax sababta.

- **Horumarinta Xirfadaha iyo Tababarka:** Sheeg qofka aad aaminsan tahay in waxbarashadiisa ama tababarkiisa si khaldan loo qiimeeyay.

3. Foomka aad buuxisay u dir QRIS@dcyf.wa.gov.

Ha soo gudbin caddeymo cusub ama dheeraad ah codsigaaga. Dib-u-eegistu waxay ku salaysnaan doontaa oo keliya caddeymaha markii hore la soo gudbiyay intii lagu jiray Wareegga Aqoonsiga Tayada

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo:

Ma soo gudbin karaa Codsiga Rafcaanka Qaybta ka dib marka Heerka Tayada la dhammeystiro?

Haa. Waxaad soo gudbin kartaa **Codsiga Rafcaanka Qaybta 14 maalmood gudahood** laga bilaabo marka Heerka Tayada la dhammeystiro.

Heerka Tayada si ku-meel-gaar ah ayaa looga saari doonaa inuu si guud u muuqdo inta rafcaanka qaybta dib loo eegayo. Dib ayaa loo soo bandhigi doonaa marka go'aan kama dambeys ah la gaaro.

Maxaa dhacaya haddii aan weli ku raacsanayn go'aanka ka dib dib-u-eegista qaybta?

Go'aanka laga gaaro rafcaanka qaybta waa **kama dambeys**. Go'aankaas mar kale rafcaan lagama qaadan karo, dibna looma furi karo wareeggaas Aqoonsiga Tayada.

Waxaad fikrad-celin qoraal ah oo ku saabsan habka dib-u-eegista u diri kartaa **QRIS@dcyf.wa.gov.** Waan qadarinaynaa fikrad-celintaada, laakiin wax kama beddeli doonto go'aanka kama dambaysta ah ee dib-u-eegista.

Maxaa dhacaya haddii aan codsigayga soo gudbiyo ka dib waqtiga kama dambaysta ah?

Si aad ugu qalanto **Codsiga Rafcaanka Qaybta**, waa inaad codsigaaga ku soo gudbisaa muddada ku habboon:

- **Haddii Wareeggaaga Aqoonsiga Tayada uu weli socdo:** Soo gudbi codsiga **45 maalmood gudahood** laga bilaabo marka qaybta la dhammeystiro.
- **Haddii Heerkaaga Tayada la dhammeystiray:** Soo gudbi codsiga **14 maalmood gudahood** laga bilaabo marka Heerka Tayada la dhammeystiro.

Codsiyada la soo gudbiyo ka dib waqtiga kama dambaysta ah ee khuseeya lama aqbali doono.

Maxaa dhacaya haddii qaybtayda la dhammeystiro ka dib marka taariikhda kama dambaysta ah ee Heerka Tayadaydu ay dhaaftay?

Haddii Heerka Tayadaada hore loo dhammeystiray, waa inaad soo gudbisaa **Codsiga Rafcaanka Qaybta 14 maalmood gudahood** laga bilaabo marka Heerka Tayada la dhammeystiro.

Muddada **45-ka maalmood ah** ma khusayso ka dib marka Heerka Tayada la dhammeystiro.

Heerka Tayada si ku-meel-gaar ah ayaa looga saari doonaa inuu si guud u muuqdo inta codsiga rafcaanka dib loo eegayo, waxaana dib loo soo bandhigi doonaa marka go'aan kama dambeys ah la gaaro.

Yaa soo gudbin kara Codsiga Rafcaanka Qaybta?

Keliya **qofka koowaad ee xiriirka Early Achievers** ee ka qaybgalaha ayaa codsan kara oo soo gudbin kara Codsiga Rafcaanka Qaybta.

Waxaan fahamsanahay in foomka oo lagu heli karo Ingiriisi oo keliya ay caqabad ku noqon karto qaar ka mid ah ka qaybgalayaasha. Ka qaybgalayaasha u baahan caawimaad buuxinta foomka waa inay bixiyaan mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Foom uu ka qaybgaluhu buuxiyay oo saxiixay; ama
- Oggolaansho qoraal ah oo ka yimid ka qaybgalaha, kaas oo qof loo magacaabay siinaya fasax inuu ka caawiyo buuxinta foomka.

Maxaan sameeyaa haddii aan su'aal ka qabo qayb?

Haddii aad su'aalo ka qabto qayb ka mid ah Early Achievers, la xiriir **Coach-kaaga** ama email u dir cqel@uw.edu si aad taageero uga hesho **Community Liaison.**

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan dhibcaha **Professional Development and Training ee lagu xisaabiyay MERIT, la xiriir kooxda QRIS** adigoo email u diraya QRIS@dcyf.wa.gov.